


WorkFirst

In lagaa caawiyo caawinta
naftaada iyo qoyskaaga.



WASHINGTON
WorkFirst

Adeegaha WorkFirst

Adeegaha WorkFirst waxaa loo hellaa si ay kuugu caawiyaan tooska xaaladaada kumeel gaarka ah. Anaga halkaan waxaan u joognaa si aynu kuugu caawino in aad shaqo heshid una haysatid. Waxaan kugu caawin karnaa in aad ogaatid:

- Xirfado shaqo, awoodo, iyo danaha aad qabto
- Shaqooyinka laga helayo meesha aad degantahay

Fursadaha WorkFirst

Madoonaysaa in aad kasbato wax ay kunoolaadaan qoyskaaga?

WorkFirst waxay kugu caawin kartaa in aad kasbato lacag kugu fillan si aad u siiso caruurtaada. Anaga waxaan haynaa fursadooyin baddan oo laheli karo waxaana kamid ah:

- Caawimaad laguugu caawinayo in aad shaqo heshid
- Tababar iyo waxbarasho
- Barnaamijyo khibrad shaqo ah
- Caawimaad kulan kharashaad ah, sida gaadiidka laraaco iyo daryeelka ilmaha



Shaqadu Lacag ayay bixisaa!

Shaqada ayaa kafiican samafalka.

Marka aad guriga keentid jeeg lacag bixin, waxaad iibsan kartaa waxyaabo baddan oo loogu talogalay qoyskaaga!

Samafalka	Jeega lacag bixinta
\$706.00 oo bil kasta ah*	\$2,800.00 oo bil kasta ah (\$16.28 saacad loogu talogalay 40 saacadood oo shaqo todobaad ah)


*Deeqda TANF ee loogu talogalay qoyska ka kooban seddex

**Ayada oo ay kutiirsantahay mushaarka ugu Yar ee Gobolka marka ay tahay Jannaayo 2024

Qiimeyn ta Buuxda

Qaado qiimeyn buuxda oo diirada lagu saarayo qoyska middaas oo kugu caawin doonta:

- Aqoonso adeegaha iyo howlaha kugu caawin doona in aad gaarto ujeeddooyinkaaga shaqaalaynta.
- Ogoow baahooyinka waxbarashadaada iyo tababarka iyo waxyaabaha aad xiiseysid.
- Aqoonso xirfadahaaga iyo awoodahaaga meelaha aad kufiicantahay.
- Sheeg wax kasta oo caqabado ah kuwaas oo ay dhici karto in ay yareeyaan awoodaada aad kushaqayso, raadi shaqo, ama u diyaar garoow shaqo.
- Sameyso ujeeddooyin shaqaalayn muddo-dheer iyo kuwo muddo-gaabani.



Ciqaabta

WorkFirst waxay soo bandhigaysaa taageerooyin baddan iyo adeego kugu caawinaya tooska xaaladaada kumeel gaarka ah. Waxaa khasab kugu ah in aad kaqayb qaadato barnaamijka kana faalideysatid taageerooyinka loogu talogalay in ay kugu caawiyaan in aad heshid shaqo oona haysatid. Haddii aad dooratid in aadan kaqayb galin, waxaad khatar ugu jirtaa in aad weyso siismada lacagtaada cadaanka ama kaashka ah.

Waxaan doonaynaa in aynu kugu caawino in aad yeelato qorshe wanaagsan oo adiga iyo caruurgaada loogu talogalay, laakiin sidoo kale, waxaa adigana khasab kugu ah in aad qaybtaada sameyso.



Caawimaada Hellida Shaqo

Shaqaalaha adeega khibrada u leh shaqaalaynta ayaa kugula shaqayn doona in aad:

- Ogaato maclumaad qiimo baddan oo kusaabsan waxyabaha aad xiiseysid ama danaysid iyo xirfado.
- Sameysid qoraal kooban oo taariikhdaada kusaabsan midkaas oo natijjooyin keena.
- Sameysid xeelado wareysi sugar.
- Kuuxaddidaan ama kuumeeleeyaan dad looshaqeeyo oo degmada jooga kuwaas oo dadka shaqeysiya.
- Kugu xiriiriyaan shaqooyinka ugu lacagta baddan kuwaas oo aad u qalanto.
- Dareentid kalsooni aad kuqabtid nafsadaada intiiba aad la kulmaysid lana xiriireysid dadka aad u shaqaysid.

Fursadaha Tababarka iyo Shaqada

U fur albaabka shaqaalaynta iyo horumarinta shaqada kadibna kasbo lacag baddan.

- Dhammee dugsiga sare ama dhammeystir u qalmidaada dugsiga sare.
- Horumari Luuqadaada Ingiriisiga, akhrinta, qoraalka iyo xisaabta adiga oo sidaasna kusameeya waxbarashada kusalaysan dadka waaweyn (ABE) ama fasalada Ingiriiska sida luuqada-labaad (ESL).
- U baro xirfado shaqo cusub si xirfadeysan, teknoloojiya, ama barnaamijyada shaqada.
- Baro wax kusaabsan gargaarka dhaqaalaha iyo adeegaha taageerada ardayga.

Khibrada Shaqada

Waxaa jira barnaamijyo baddan oo kusaabsan khibrada shaqada kuwaas oo kuusoo bandhigi kara fursad ah in aad:

- Heshid xirfado shaqo qiimo leh oo ah meesha goobta shaqada.
- Horumarisid xirfado meel shaqo si aad diyaar ugu noqotid shaqooyinka mustaqbalka ah.
- Kugu caawiya in aad si wanaagsan u maareysid caqabadaha noloshaada.
- U heshid tababar iyo fursado waxbarasho marka aad shaqaynaysid.
- U samaysid qalab kugu caawin doona adiga iyo qoyskaaga in aad katagtaan TANF.
- Lasameysid xiriyo dadka loo shaqeeyo oona dhistid tixraacyo.



Daryeelka Ilmaha

- Waxaan kugu caawin karnaa in aynu kusiino lacag loogu talogalay daryeelka ilmaha marka aad shaqaysid, ama xaaladaha qaarkooda, in ay dugsiga aadaan.
- Haddii aad u qalantid, adiga keliya waxaa khasab kugu ah in aad bixisid qayb kamid ah qimaha daryeelka ilmaha, qoysaska qaarkooda, waa mid yar oo ah illaa \$0.
- Waxaa jira noocyoo baddan oo kaladuwan oo ah bixiyaasha daryeelka ilmaha si looga doorto.

Si laguugu caawiyo hellida bixiye daryeel ilmo rukhsadaysan kawac Kawarhaynta Daryeelka Ilmaha lambarkaan:

1-844-626-8687

Taageerada Shaqaalaynta

Adeegaha taageerada WorkFirst ay bixiso waa waxyaabo aad u baahantahay in aad shaqayso, raadisid shaqo, ama u diyaar garoowdo shaqo.

Adeegaha taageerada waxaa kamid noqon kara:

- Bas la raaco
- Dhar shaqo iyo waraysi
- Hagaajin baabuur
- La talin
- Xafaayado
- Kharashaad waxbarasho
- Nadaafad shakhsiyeed
- Rukhsad / lacago
- Timo jarid
- Qalab iyo alaab
- Qorshe qoys
- Gaas masaafada safarka ah

Macluumaada Qorshaynta Ilmaha Qoyska

Ina keen aynu kahadalno waxa kusaabsan sababta uu muhiim u yahay Qorshaha Qoyska!

Waad awoodaa in aad go'aansato marka aad diyaar u tahay in aad haysato ilmo kale. U qorshaynta ilmaha qoyska wuxuu kusiinayaad doorashooyin iyo xakamayn aad kuxameyso mustaqbalkaaga dhaqaalo.

- Wuxaan laxiriiri kartaa xafiiska dhakhtarkaaga, farmashiyaha,, ama bixiyaha u qorsheynta qoyska wixii kusaabsan macluumaad baddan.
- Ayagu waxay kuu sharxi karaan waxa ay yihiin qaababka u qorsheynta qoyska laheli karo si aad u go'aansato waxa adiga kuu fiican.
- Kaarkaaga Adeegaha Caafimaadka wuxuu bixinayaa waxyaabo dhalmada looga hortago oo dhakhtar soo qorey, waxyaabaha dhalmada looga hortago ee degdega ah, iyo qaabab kale oo aan waddan-warqad dhakhtar.

Ceymisk Kujirida Daryeelka Caafimaadka

Haddii aadan haysan ceymis kujirid daryeelka caafimaadka ah, waxaad kacodsan kartaa tooska Washington Healthplanfinder adiga oo:

- Wacaya 1-855-923-4633, ama
- Buuxiya codsiga tooska ah ee kujira bogga intarnatka www.wahealthplanfinder.org, ama
- Keena codsiga oo buuxa meesha degmada uu kuyaalo xafiiska adeega bulshada Qaybta Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka (CSO).



Taageerada Ilmaha

Taageerada Ilmaha waxaa laga:

- Soo aruurin karaa waalidka aan lanoolayn ilmaha.
- Waxay kugu caawin kartaa inaad ahaatid qof madax-banaan.
- Kucaawin kartaa caruurtaada in ay qabbaan nolol wanaagsan.
- Kusiin kartaa lacag baddan oo loogu talogalay dhar, cunto, iyo waxyaabo kale oo muhiim ah.

Fadlan lahadal Sarkaalka Fullinta Taageeradaada
haddii aad qabtid wax su'aalo ah, ama wac:

1-800-442-KIDS

(1-800-442-5437)

Maclumaada Rabshada Qoyska

- Majiraq qof kudhibaya ama malagu soo dhibey?
- Majeceslahay in laguugu caawiyodh ladhaqmida qof midkaas oo kuuhanjabaadaya ama kudabagalaya?
- Maka welwelsantahay in kaqayb galka howlaha WorkFirst ee caadiga ah ama aruurinta taageerada ilmaha ay noqon karto khatar ama kadhibi karto waxyaabaha in ay aad kuugu sii adkaadaan adiga ama caruurtaada?

Haddii ay sidaas tahay, waxaan kuu wareejin karnaa dad kugu caawin kara in aad u qorsheysatid badbaadadaada, bixisid taageero dareen soconaya, kuguna xira ilooyin kale oo caawimaad leh.

Siddoo kale waxaan awoodi karnaa in aynu si kumeel gaarka ah kaaga cafino hawlaha shaqada iyo aruurinta taageerada ilmaha – fadlan lahadal maamulahaaga kiiska Qaybta Adeegaha Bulshada iyo Caafimaadka si aad u heshid maclumaad baddan.

Sidoo kale waxaad kalaxiriiri kartaa Khadka marwalba shaqeeya ee Rabshada Guriga ahaan degmada lambarkaan 1-800-799-7233 wixii kusaabsan maclumaad, wareejino, iyo taageero. Wicitaanka khadka marwalba shaqeeya waa kuwo lacag la'an ah oona sir ah.

Kabixida WorkFirst?

Waad helli kartaa caawimaad marka aad kabaxdid ama katagtid WorkFirst

Adeegyada Taageerada

- Waxaad xaq u yeellan kartaa caawimaadda gaadiidka la xiriirta sida gaaska, kaararka baska lagu raaco iyo dayactirka baabuurka ilaa 5 bilood.

Caawimaada Cuntada Kumeel gaarka ah

- Waxaa dhici karta in aad u qalantid dheefoojin cunto soconaya oo gaaraya illaa 5 bilood. Dheefaha cuntada markaas kadib waa kuwo kutiirsan dakhligaaga kharashaadka nolosha, iyo inta ay la egyihiiin dadka guriga kunool.

Ceymis Kujirida Daryeelka Caafimaadka

- Waxaa dhici karta in aad u qalantid ceymis kujirida daryeelka caafimaadka haddii aadan hellin TANF

Shaqaalaynta Cuntada Aasaasiga ah iyo Tababarka

- Haddii aad heshid Cuntada Aasaasiga ah, waxaa dhici karta in aad awoodid in aad heshid raadis shaqo, tababar shaqo raadis ah, adeego waxbarasho, tababar xirfado, meeleynta adeega bulshada, adeegaha taageerada kahoreysa-shaqaalaynta, iyo fursadooyin kale oo shaqaalayn. Haddii aad hore uga qayb galaysay kulliyad bulsho ama teknoloji, kumeel gaarka Shaqaalaynta Cuntada Aasaasiga ah iyo Tababarka wuxuu kugu caawin karaa in aad dhammeystirtid ujeeddooyinkaaga waxbarasho. Wixii kusaabsan macluumaad baddan, laxiiri xafiiska kulliyadaada Shaqaalaynta Cuntada Aasaasiga ah iyo Tababarka, ama gal bogga intarnatka <https://www.dshs.wa.gov/esa/community-partnership-program/basic-food-employment-training-bfet>

Guryaynta HUD

- Caawimaada in aad heshid guri qiimo-yar gal boggaan internetka ah www.hud.gov

Aruurinta Taageerada Ilmaha

- Anagu weli waxaan aruurinaa taageerada ilmaha, laakiin hadda adiga ayay kugu socotaa!

Daryeelka Ilmaha

- Waxaa dhici karta in aad weli sii heshid daryeelka ilmaha haddii aad shaqaynaysid

Kabixida WorkFirst? Sii socota...

Caawimaada laguugu caawiyo in aad heshid shaqo wanaagsan

- Aad xafiis kasta oo WorkSource ah. Wuxaa kaheli kartaa xafiiska kuugu dhow kana raadin kartaa shaqooyin boggaan intarnatka WorkSourceWA.com

Deynta Canshuurta Dakhliga Lakasbaday (EITC)

- Joojinta canshuurta loogu talogalay qoysaska dakhliga-yar ee shaqeeya: Deynta Canshuurta Dakhliga Lakasbaday boggaintarnatka: www.irs.gov iyo raadiska EITC.

LIHEAP

- Caawimaada bixinta qiimooyinka kululeysyadaada iyo qaboojiyaha Bogga intarnatka LIHEAP: www.commerce.wa.gov iyo raadiska LIHEAP.

Ilooyinka Gudaha ama degmada

Bogga intarnatka WorkFirst

www.workfirst.wa.gov/



Shabakada Macluumaada Washington 211:

<http://win211.org>



Xiriirka Washington

<http://washingtonconnection.org>



- Bangiyada Cuntada Degmada
- Xiriirada Degmada
- Xarumaha Caafimaadka Degmada
- Taageerada Ilmaha iyo Ilooyinka Degmada
- Guryaynta

Haddii aad qabtid su'aalooyin ama u baahantahay macluumaad baddan, fadlan laxiriir Xafiiska Adeega Bulshada ama laxiriir xarunta.

Qoraallada iyo lambarada telefoonka



DSHS 22-1125 SM (Rev. 10/24) Somali